MUSHARRAX MADAXWEYNE

PUNTLAND 2019 - 2024

SICIID CABDULLAAHI DENI

Deni@2019, Puntland
#DooroDeniPL2019

Waxa aad kala degi kartaa Google-ka isaga oo ah PDF, sida oo kale waxa aad ku heli kartaa dalab gaar ah iyada oo aan wax khidmad ah lagaa qaadayn.

ANDROID APP ON Google play

Kala soo deg, Google Play Store

Waa Farriin ku socota muwaaddin kasta oo Reer Puntland ah si loogu dhiirrigeliyo qorshayaal qoran oo lagu hagi karo Puntland. #DooroDeni

#Deni4Puntlnad2019
#Tayeyn&Tiigsi

Garoowe, Puntland Soomaaliya
Deni@2019, DoorashadaPL2019
#Tayeyn&Tiigsi, #Deni4PL2019
Copyright@DeniTeam

xooshdesings@gmail.com
FB: XooshDesings
+252907754115

Xoosh Designs
Graphic & Book Designs

8 YOOL

66 BALLANQAAD

SICIID CABDULLAAHI DENI

@DeniMedia

TUSMADA

HORUDHAC	5
NUXURKA FARRIINTA	9
HAL-KU-DHIGGA	10
YOOLKA 1-AAD	12
YOOLKA 2-AAD	17
YOOLKA 3-AAD	21
YOOLKA 4-AAD	28
YOOLKA 5-AAD	34
YOOLKA 6-AAD	39
YOOLKA 7-AAD	42
YOOLKA 8-AAD	45
LIFAAQ B	47

HORUDHAC

Barnaamijkaan siyaasadeed waxa uu soo bandhigayaa Ballan-qaadyadayda aan soo hordhigayo shacabka reer Puntland iyo tallaabooyinka aan rabo in aan qaado haddii aan ku guulaysto xilka Madaxweyne ee Dawladda Puntland, Qormadanwaxaankusoogudbinayaa Siyaasadaha iyo Ajandayaasha aan ka fulinayo Puntland si loo tayeeyo guulaha la gaaray loona tiigsado hirgalinta filashada Bulshada.

Aniga oo Ilaahay kaashanaya, waxaa iga go'an in aan aqoontayda, waayo-aragnimadayda iyo aragtida siyaasadeed ee aan xambaarsanahay aan uga faa'iideeyo shacab-kayga aan jeclahay. Waxa aan ku rajo weynahay in aan helo taageeradiinna iyo kalsoonida Xildhibaanada sharafta leh ee Puntland si aan u hirgalino barnaamijkaan siyaasadeed ee aan u dejinay in lagu horumariyo Puntland.

Bulshada reer Puntland waxa noo dhexeeya, rabaana in ay igula xisaabtamaan fulinta Ballan-qaadyada ku qoran Barnaamijkaan Siyaasadeed. Waxaan ku kalsoonahay Baraarugga shacabka iyo sida ay uga go'antahay maanta in aanay ka aamusin mar-danbe in lagu takrifalo awoodda dawladnimo ama looga baxo ballan-qaadyada lala galo xilliga doorashada.

Barnaamijkaan siyaasadeed waxa uu xoogga saarayaa dhinacyo badan oo muhiim ah sida: hirgalinta isbedel siyaasadeed oo dhaxal-gal ah, xoojinta Amniga, kobcinta dhaqaalaha, tayeynta adeegyada bulshada, taabbo galinta garsoorka iyo sarraynta sharciga, daryeelka deegaanka, horumarinta dhalinyarada iyo mudnaan siinta haweenka. Barnaamijkaan siyaasadeed ee aan idin la wadaagayo waa mid aan la kaashaday khibradayda iyo xogta aan ka hayo

Puntland, la tashiga khubaro xog-ogaal u ah xaaladda Puntland iyo daraasaado dhawra oo laga sameeyay xaaladaha siyaasadeed, amni iyo dhaqan-dhaqaale ee Puntland ku sugantahay, waxaan si gaar ah ugu mahad-celinayaa cid kasta oo aragti iyo fikrad ku darsatay barnaamijkaan.

Shantii sano oo u dambaysay Maamulka talada haya waxa uu ku guul-darreystay u adeegidda bulshada, sugidda amniga, hirgalinta sarraynta sharciga, sidoo kale waxa uu ku takri-falay awoodda dawladda, wuxuuna gaystay musuq-maasuq baahsan oo dhaawacay hannaanka dawladnimo.

Siciid Cabdullaahi Deni

Musharrax Madaxweyne

Dowladda Puntland 2019

“RUNTU WAXAY TAHAY IN PUNTLAND ISTAAHISHO HOGGAAMIYE DAACAD AH OO SHARCIGU KA SARREEYO.”

NUXURKA FARRIINTA

Puntland waxay jirtay maamul ahaan muddo labaatan sano ah, waxayna soo martay marxalado kala gadisan, ayna soo hoggaamiyeen madax kala duwan, shakina kuma jiro in la gaarey qayb ka mid ah yoolashii loo asaasay Puntland; sida: dhismaha hannaanka Dawladnimada, hase ahaatee 20 sano kaddib yagleelkii Puntland, dadka reer Puntland waxay dareemayaan inaan la gaarin horumar dhamaystiran iyo maamul-wanaag. Haddaba, doorashada 2019 waxay kusoo beegmaysaa marxalad xasaasi ah oo kala wareeg ah, loona baahan yahay in la xaqiijiyo helitaanka hoggaan siyaasadeed oo leh aragti, waayo-aragnimo, hufnaan iyo waddaniyad, si loo gaaro maamul-wanaag dhamaystiran.

BARAARUJIN

Doorashada 2019 waxay kusoo beegmaysaa marxalad xasaasi ah oo kala guur ah, loona baahan yahay in la xaqiijiyohelitaankahoggaansiyaasadeed oo leh aragti, waayo-aragnimo, hufnaan iyo waddaniyad, si loo gaaro maamul-wanaag dhamaystiran.

!

HAL-KU-DHIGGA

Hal-kudhigani wuxuu xambaarsan yahay, soona koobayaa Aragtidayda Siyaasadeed:

TAYEYN

waxa ay ka macno tahay in 20 kii sano ee Puntland soo jirtay, ay jiraan guulo lagu tilaabsaday iyo guul-darrooyin dhacay, waxaana hubanti ah in horumarka laga sameeyay dhanka dawladnimada uu aad uga hooseeyo filashadii bulshada Puntland, hay'adaha dawliga ahna in badan oo kamida ay u jiraan qalfoof ahaan (Magac-uyaal) ayna laga maarmaan tahay tayeyntooda iyo dib u habeyntooda si ay u noqdaan kuwo taabbo-gal ah oo ka jawaabi kara baahiyaha bulshada Puntland.

&

«

TIIGSI

waxa uu ka tarjumayaa hiraalka iyo hiigsiga siyaasadeed waqtiga dhaw iyo waqtiga fog, iyada oo laga duulayo: Xagee ka nimi? Xagee joognaa? Xageese usoconaa? Yoolkuna yahay in lagaaro dawladnimo hana qaad ah oo gaarsiisan filashada bulshada.

BARNAAMIJ SIYAASADEEDKAYGA

YOOLKA 1-AAD

Isbeddel Siyaasadeed Oo Laga Hirgaliyo Puntland 2019-2024

CAQABADAHA HAYSTA NIDAAMKA SIYAASADEED EE PUNTLAND

1. Nidaamka Siyaasiga ah ee Puntland oo aan sidii la rabey u shaqeyn, Hay'adaha Dawliga ahina uma gutaan shaqadooda sidii loo baahnaa, dawladduna waxay ka gaabisay in ay fuliso ballanqaadyadii siyaasiga ahaa oo ay qaaddey ayna ka mid ahaayeen in ay dalka ka abuurto nidaamka Xisbiyada badan ee Dimoqoraadiga ah iyo in doorashada 2019 ay ku dhacdo nidaamka hal cod iyo hal qof.

2. Musuqmaasuq baahsan oo astaan u noqday dhaqanka dawladnimo, kaasoo ragaadiyey Nidaamkii Siyaasiga ahaa iyo Hay'adihii Dawliga ahaaba, taasoo ay ugu wacan tahay in awoodda dawladda oo dhami kusoo aruurtay hay'adda fulinta (Madax-kanool).

3. Fursadaha kala duwan oo aan loo sinnayn oo nin jeclaysi iyo eex lagu maamulo, gaar ahaan fursadaha shaqada, waxaana ka dhashay arrintaas burbur bulsho iyo naceybkii oo kordhay, sidoo kale waxay sababtay: amni-darro, Tahriib, dhaqaalo xumo baahsan iyo khal-khal siyaasadeed.

4. Kaalintii Puntland ay ku laheyd dib u curashada dawladnimada Soomaaliya iyo hirgalinta nidaamka federaalka oo hoos u dhacday, taas oo ay sabab u tahay in aysan jirin aragti iyo mabaadi' sugan oo ku aadan arrimahaas.

5. Midnimada dad iyo dhuleed ee Puntland sida ku xusan dastuurkeeda oo dhaawacantey, kaddib markii lagu fashilmay soo celinta dhulka maqan gaar ahaan qeybo kamid ah gobolka Sool.

BALLAN-QAADKA 1AAD:

@ Taabba-galinta Sharciga iyo Qaanuunka si loo helo Hay'ado dawli ah oo iskor joogteeya isuna dheeli tiran (Checks and Balance) oo macneheedu yahay in la helo Gole Baarlamaan oo ka madax-bannaan Hay'adda fulinta, awoodna u leh la xisaabtankeeda iyo Garsoor tayeysan oo ilaaliya sarraynta sharciga.

BALLAN-QAADKA 2AAD:

@ Dib-u-qaabeynta Hay'adaha Dawliga ah ee Puntland, iyadoo dib-u-eegis lagu samaynayo tirada, tayada iyo xeerarka lagu asaasay Hay'adahaas si loo kala caddeeyo waajibaadkooda shaqo, sarena loogu qaado tayadooda shaqo, ayna ula jaanqaadaan isbeddelka cusub ee la doonayo in laga sameeyo dhinaca siyaasadda iyo dhismaha dawladnimada, qorshahaan waxaa lagu dhamaystirayaa sannadka ugu horreeya ee Xukuumadda cusub.

BALLAN-QAADKA 3AAD:



@ Xoojinta kalsoonida u dhaxaysa Dawladda iyo bulshada iyadoo loo marayo wadatashi, daah-furnaanta go'aan gaarista iyo fulinta ballan-qaadyada barnaamijka siyaasadeed ee musharraxa; sidoo kalena la xoojnayo la tashiga qeybaha kala duwan ee bulshada si ay u fusho siyaasadda dawladdu, loona helo nidaam dawli ah oo lawada ilaashado.

BALLAN-QAADKA 4AAD:

@ Hirgelinta nidaamka Dimuqraadiga ee Xisbiyada Badan sannadka ugu horreeya ee xukuumadda cusub, waxaa kale oo la xoojinayaa hannaanka maamul daadajinta (Decentralization) si fursad loogu siiyo shacabka reer Puntland doorasho furan oo xor ah oo ay ku doortaan madax ay laxisaabtami karaan, isla markaasna ay ka helaan adeeg bulsho oo tayo leh ilaa heer degmo iyo tuulo.

BALLAN-QAADKA 5AAD:

@ Xoojinta Kaalinta Puntland ay ku leedahay Soomaaliya iyo hirgelinta nidaamka Federaalka ah, iyadoo la ilaalinayo maqaamka Puntland iyo Dawladnimadeeda ku dhisan hannaan dawladnimo oo ay sal u tahay in waxna la wada leeyahay waxna lakala leeyahay, iyadoo la abuurayo Isfahan iyo wadashaqeyn dhexmarta Dawladdaha xubnaha ka ah D.F iyo Dawladda Federaalka si loo xoojiyo soo celinta dawladnimada Soomaaliya.

BALLAN-QAADKA 6AAD:

@ Xoojinta kaalinta ay ku leeyihiin saxaafadda madaxa bannaaniyo ururrada bulshada (Civil Society) korjoogtaynta waxqabadka hay'adaha dawladda iyo u qareemidda xuquuqda muwaadiniinta, iyadoo la xaqiijinayo Daah-furnaanta Hawlaha golayaasha dawladda, si xogta uu helaayo muwaadinku ay u noqoto mid daahfuran oo aan waxba ka qarsoonayn.

BALLAN-QAADKA 7AAD:

@ Xoojinta awoodda Puntland u leedahay gelidda heshiisyo horumarineed iyo kuwo maalgashi si waafaqsan shuruucda dalka, iyada oo la xaqiijinayo in heshiisyadu noqdaan kuwo daahfuran oo laga ansixiyo dhammaan golayaasha dawladda si furanna loogu soo bandhigo shacabka. Sidoo kale in dib u eegis lagu sameeyo dhammaan heshiisyada horumarineed ama maalgashi ee horay loo galay.

BALLAN-QAADKA 8AAD:

@ Ilaalinta midnimada Puntland (Dad iyo Dhulba) iyada oo mudnaan gaar ah lasiinayo soo celinta dhulka maqan ee Dastuurku uu qeexayo, iyada oo dawladdu ka yeelanayso siyaasad horumarineed loona astaynayo qoondo miisaaniyadeed oo gaar ah oo ku wajahan dhulka maqan iyo kuwa fog-fog (Remote Areas).

BALLAN-QAADKA 9AAD:

@ Hirgalinta nidaam siyaasadeed oo leh matalaad loo siman yahay, suurtagaliyana in dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshadu iska dhex aragto, gaar ahaan haweenka, dhallinyarada iyo qaybaha kale ee bulshada oo tabashada ka qaba matalaadda siyaasadeed.



YOOLKA 2-AAD
SUGIDDA AMNIGA PL

CAQABADAHA HAYSTA AMNIGA PUNTLAND

1. **Awoodda Hay'adaha Amniga oo hooseysa:**

I. *Mudadii u dambeysay waxaa hoos u dhacay Aragtida iyo Himilada ku jiheysan ammaanka Puntland, waxaana aan la fulin dhammaan Sharciyada la xariira sugida Ammaanka.*

II. *Ciidamada Amniga oo aan helin tababar ku filan, haysanna agab iyo mushaar joogto ah; qaarkoodna ma haystaan xarumo ciidan oo ay ku hawlgalaan, iyadoo ay liidato tayada ciidan haba badnaato tiradooduye.*

III. *Ciidanka oo aan haysan dammaanad Dawladeed, taasoo keenta inuu ka baaqsado inuu tallaabo ka qaado kuwa ku xad-gudbaya sharciga isagoo ka baqaya inay ka aarsadaan amaba loo qabsado wixii dhib ah ee uu gaysto (Askarigu Qorigiisa isagaa la yimaada, wixii uu geystana reerkiisa ayaa loo raacdaa).*

IV. *Ciidamada oo aan laheyn Amar qaadasho dhexe oo mideysan (Centeral Command) taas oo keentay in ciidanku noqdo garabyo kala duwan oo u-abaabulan hab beeleed.*

2. Hubka ku jira gacanta shacabka oo faraha ka baxay; waxaana ka dhashay colaado sokeeye iyo fal-dambiyeedyo kala duwan, Cilmi baaris ay sameysay Xarunta PDRC muddadii u dhaxaysay 2011-2014 waxay tilmaamaysaa in Puntland lagu dilay muddadaas 858 qof, laguna kufsaday 494 gabdhood, waxaana fududeeyey hubka faraha badan ee ku jira gacanta dadweynaha kaasoo lagu qiyaasay 750,000 oo qori. Waxaana xaqiiqa ah in maanta oo la joogo 2018 xaaladdaasi ay ka sii daran tahay.

3. Xiriirka Booliiska iyo bulshada oo aad u hooseeya taasoo ay sababtay kalsooni darro ka dhex-jirta labada dhinac.

4. Argagixiso - taasoo abuurtay khalkhal amni iyo falal amni-darro ah oo ka dhaca meelo fara-badan oo Puntland ka mid ah. Haatanna maraysa heer ay ku handadaan kuna khaarijiyaan ganacsatadii waaweyneyd iyo haldoorka bulshada si ay uga qaadaan lacago baad ah.

5. Xuduudaha ay leedahay Puntland Bad iyo Berri oo iska furan intooda badan, taas oo u fududaynaysa danbiilayaasha caalamiga ah in ay ka fuliyaan Puntland dambiyo abaabulan, sida: falal argagaxiso, tahriibinta dadka, soo galinta hubka iyo mukhaadaraadka.

BALLAN-QAADKA 10AAD:

@ Dib-udhisidda hay'adaha Amniga iyo Sirdoonka Puntland iyadoo dib-u-eegis lagu samaynayo: Qorshayaasha, istaraatiijiyadda iyo siyaasadaha Amni ee jira, si loo helo nidaam Amni oo tayo leh, waxaana qorshahaan lagu fulinayaa Sannadka ugu horreeya Xukuumadda cusub ee aan soo dhisi doono Insha Allaah.

BALLANQAADKA 11-AAD:

@ Dib-u-habeynta dhammaan ciidamada kala duwan ee haatan u kala daadsan iyadoo loo xil-saarayo guddi khubaro ah oo ka shaqeeya tayeyntooda, isku-dhafkooda iyo qalabayntooda, taas oo lagu dhamaystiri doono Sannadka ugu horreeya xukuumadda cusub ee aan soo dhisi doono Insha Allaah.

BALLANQAADKA 12-AAD:

@ Koobidda tirada ciidanka Amniga Puntland iyadoo lagu salaynaayo baahida amni ee dalka ka jirta, waxaana loo dhamaystiraayaa xaquuqdooda, tababarkooda, saanaddooda iyo agabka kale ee ay u baahan yihiin, miisaaniyadda haatan lagu hafro Amniga oo dhan 31% waxay ku filan tahay maareynta Amniga hadii si amaano iyo aqoon ku dheehantahay loo maamulo.

BALLAN-QAADKA 13AAD:

@ Dejinta qorshe iyo siyaasad ku aaddan xakamenynta hubka ku jira gacanta dadweynaha, iyadoo la mamnuucayo ka ganacsiga hubka, iyo in hubka magaalooyinka lagu dhex-wato, sidoo kalena la tirakoobayo hubka culus ee gacanta qabaa'ilka ku jira.

BALLAN-QAADKA 14AAD:

@ Xoojinta is-fahanka iyo wada-shaqeynta u dhaxeysa Booliska iyo bulshada, iyadoo dib-uqaabeyn lagu sameynayo habka ay haatan u dhisan yihiin ciidamada booliiska, lagana mamnuucayo ka mid noqoshada booliiska shakhsiyaadka horay u galay falal dambiyeed, xooggana la saarayo waxa loo yaqaan Bulshada iyo Booliiska wada shaqeeya (Community Policing) iyo sare u qaadida wacyiga bulshada ee ku aadan sugidda amniga.

BALLAN-QAADKA 15AAD:

@ Ciribtirka canaasiirta argagixisada ee ku dhuumaalaysanaya buuralayda Cal-madaw iyo Cal-miskaad, iyada oo ay barbar socoto in la helo caddaalad bulsho sida in loo sinnaado fursadaha shaqada, mashaariicda horumarinta iyo helista matalaadda siyaasadeed, isla markaana la xoojinayo ka wacyi-gelinta bulshada afkaaraha xagjirka ah iyo fahanka qalloocan ee Diinta, lana abuurayo nidaamka isweydaarsiga iyo wadaagga xogta ururrada xagjirka ah heer Maamul-goboleed iyo heer Dawladda Federaalka ah.

BALLAN-QAADKA 16AAD:

@ Adkaynta xuduudaha Puntland ee Bad iyo Berriba, iyadoo iskaashi dhow lagala sameynayo dowladda federaalka iyo dawlad-goboleedyada ay xuduudaha wadaagaan dawaladda Puntland ee Soomaaliyeed.

BALLAN-QAADKA 17AAD:

@ Xaq-siinta Ciidanka, iyadoo la ansixinayo Xeerka Xaq-siinta Ciidanka Puntland; kaasoo xaq u siinayaa qof kasta oo ciidan ah Mushaar joogto ah, gunno-hawleed, duug, bixinta diyada/magta qofka si kama' ah ugu dhinta gacanta ciidanka, daaweynta ciidanka xanuunsada, bixinta hawl-gabka iyo kafaala-qaadka agoonta ciidanka.

YOOLKA 3-AAD
DIB-U-HABEYNTA NIDAAMKA MAALIYADDA IYO KOBCINTA DHAQAALAHA PL

CAQABADAHA HAYSTA NIDAAMKA MAALIYADDA IYO DHAQAALAHA PL

1. Kororka dhaqaalaha oo hooseeya (Weak Economic Growth), taasoo aan laga filan karin maamul 20 sano jirsaday oo intaas heystay xasillooni Amni oo asaas u noqon kartey in la helo horumar dhaqaale.

2. Miisaaniyadda Dawladda oo aad u liidata (Weak Government Budget) taas oo keentay in Dawladdu markasta ay ku jirto is-dhin miisaaniyadeed (Budget Deficit) oo ay sababto maamulka canshuurta oo aan fadhiyin iyo dakhliga soo xerooda oo la musuq-maasuqo, waxaa kale oo uga sii daray ku dhaqan la'aanta miisaaniyadda.

3. Mashruucii Bangiga Aduunka qaybtii kaga soo aaday Puntland oo fulintiisa lagu fashilmay ilaa heer la kala diro madaxdii xafiiska Guddiga Shaqada iyo Shaqaalaha ka

gadaal musuqmaasuq hareeyay hannaankii qaadashada shaqaalaha Bangiga Adduunku ku taageerayay dawladda Puntland, iyada oo ka mira dhalinta mashruucaan uu shardi u ahaa daah furnaan maaliyadeed iyo dib u habayn shaqaale, si Puntland markaas u hesho kabis dhanka maaliyadda ah gaar ahaan mushaarka shaqaalaha.

4. Heerka dakhli ururinta degmooyinka oo liita, iyada oo xitaa ilaha dakhliga ee ku xusan xeerka Lr.7, 2003 dii laga fuliyo inyar oo kooban oo aanay daba socon isla-xisaabtan iyo xisaabi xil maleh.

5. Shaqo la'aanta da'yarta; iyadoo 67% dhalinyaradu shaqo la'aan yihiin sida ku xusan qorshaha horumarinta Puntland ee shanta sano (2013-2018)

6. Sarrifka lacagaha qalaad ayaa ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee Puntland haysta, maadaama aysan jirin cid maamulaysa siyaasadda lacagta waddanka, waxaa wax fudud noqday in ganacsatadu ay noqdaan kuwa jaangooya sarrifka lacagaha, sannadkii 2013kii bishii January $1 waxaa lagu sarrifi jirey 22,000 So. Sh, haddana 2018 wuxuu kusoo dhaw yahay in $1 lagu sarrifo 35,000 So. Sh celcelis.

7. Isu-dheellitirnaan la'aanta wax-soo-dhoofinta (import) iyo wax-dhoofinta (export), waxaan soo dhoofisanno waxay gaaraayaan 78%, halka waxaan dhoofinnaana uu yahay 22%, waxaa caqabad weyn ku ah suuq-geynta khayraadkeena badda jariifka ba'an ee lagu hayo badda, taas oo hoos u dhigtay awoodda dhoofinta kalluunka iyo aargoosatada ee kalluumaysatada iyo ganacsatada reer Puntland.

8. Waxaa soo ifbaxaya in ay khatar ku jirto dabaqadda dhexe ee bulshada sababtuna tahay shaqo la'aanta, abaaraha soo noq-noqday, ganacsato badan oo dhaqaalahoodii dalka dibaddiisa ula cararay, sicir-bararka xad-dhaafka ah, mususmaasuqa baahsan iyo amni darrada soo siyaadaysa.

9. Kaabayaasha dhaqaale oo aan gaarsiisneyn meeshii loo baahnaa, iyadoo jidka dheer ee isku xira Garoowe iyo Bosaaso uu la liito dayactir-la'aan keeni karta in hadhow aan si fudud wax looga qaban karin, ilaa haddana Xukuumadda hadda jirta waxay ku guul-darreysatay hirgalinta dhismaha waddada laamiga ahayd ee Garoowe-Gaalkacayo taas oo aheyd deeq caalami ah oo la musuq-maasuqay. Sidoo kale waxaa jira wado xumo ka jirta goobaha wax soo saarka ee dalka.

BALLAN-QAADKA 18AAD:

@ Dib-u-habeynta nidaamka maaliyadda, gaar ahaan nidaamka dakhli uruurinta (Revenue Collection) ee Dawladda Puntland, iyadoo la xoojinayo qaabka dakhliga loo soo uruuriyo, la tayeynayana shaqaalaha iyo hawlwadeennada maamula canshuuraha, lana ballaarinayo salka (Base) canshuuraha la qaado heer maamulka dhexe ee Puntland iyo degmooyinka.

BALLAN-QAADKA 19AAD:



@ Dhaqangelinta iyo ku dhaqanka miisaaniyadda Dawladda oo ay ansixiyaan Golayaasha Dawladdu, taasoo ah mid isu dheelli-tiran, qof walbana loo dammaanad qaadayo inuu xuquuqdiisa oo dhamaytiran helayo, iyadoo la xoojinayo awoodda Hanti-dhowrka, Xisaabiyaha Guud (Xisaabiye Idman) heer Dawlad dhexe ee Puntland ilaa heer Degmo, waxaa kale oo la hirgalinayaa hannaanka xogta daaha-furan ee lala wadaagayo shacabka, si ay laftigoodu qeyb uga noqdaan hannaanka xisaabi xil-maleh ama korjoogtaynta iyo ilaalinta dakhliga (Revenue Control).

BALLAN-QAADKA 20AAD:

@ Mudnaansiinta la dagaallanka aafada musuqmaasuqa ragaadiyey nidaamka dawladnimo ee Puntland, iyadoo la xoojinayo isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta, lana adkaynayo maamul-wanaagga iyo sarraynta sharciga, madaxbannaani buuxdana la siinayo Hay'adaha Dawladda u qaabilsan ee ku xusan

BALLAN-QAADKA 21AAD:

@ Dhiirri-gelinta Hal-abuurka la xiriira ganacsiga iyo shaqa abuurka heer qofeed iyo heer kooxeed (Sida Dhiiri galinta Ganacsiyada yar-yar, Iskaashatooyinka iyo Warshadeynta Dhaqaalaha).

BALLAN-QAADKA 22AAD:

@ Mudnaan-siinta suuq-geynta iyo maalgashiga khayraadka dalka Alle ku galladay sida: Kalluunka, Xoolaha, Maydiga, Beeraha, Macdanta iyo batroolka, iyadoo lasoo dhaweynayo cid kasta oo daneynaysa in ay dalkeenna maalgashadaan si waafaqsan xeerarka iyo shuruucda dalka u deggan isuna dheelli-tiraysa ka faa'iidaysiga khayraadka dabiiciga ah iyo ilaalinta deegaanka.

BALLANQAADKA 23-AAD:

@ U howlgalka hirgalinta goobo caafimaad oo lagu daryeelo xoolaha si loo ilaaliyo tayadooda, adkaysigooda iyo kaalinta ay kaga jiraan tartanka suuqyada loo iib geeyo iyo sidoo kale in sare loo qaado wacyiga badbaado iyo caafimaad ee xoola-dhaqatada ee ku aadan adeegsiga daawooyinka xoolaha iyo latacaalista cudurada ku dhaca xoolaha.

BALLAN-QAADKA 24AAD:

@ Dhisidda guddi khubaro dhaqaale iyo deegaan oo ka tala bixiya samaynta iyo hirgalinta siyaasadda deegaamaynta Xoolo-dhaqatada Puntland, si loo horumariyo waxna looga badalo qaab nololeedka xoolo-dhaqatada reer Puntland.

BALLAN-QAADKA 25AAD:

@ la dagaallanka kalluumaysiga sharci-darrada ah ee faraha ba'an ku haya khayraadka baddeenna, iyadoo dib-u-eegis lagu sameynayo dhammaan shatiyada Kalluumaysiga ee la siiyay maraakiibta Ajnabiga ah.

BALLAN-QAADKA 26AAD:

@ Dhiirrigelinta ganacsiga xorta ah ee Puntland, iyadoo mudnaan gaar ah la siinayo Hay'adaha qaabilsan ganacsiga iyo maalgashiga sida: Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha iyo Rugta Ganacsiga si loo xoojiyo awoodda aqooneed, maamul iyo farsamo ee Puntland u leedahay Horumarinta ganacsiga, soo jiidashada maalgashiga caalamiga ah iyo suuq-geynta waxsoo-saarka.

BALLAN-QAADKA 27AAD:

@ Ilaalinta iyo badbaadinta dabaqadda dhexe ee bulshada oo astaan u ah xasilloonida dhaqaale ee bulsho kasta iyo is-qaadashadeeda, iyadoo taageero iyo dhiiri galin lala garab istaagayo dadka danyarta ah, lana ilaalinayo Nidaamka dhaqaalaha ee dalka.

BALLAN-QAADKA 28AAD:



@ Mudnaansiinta horumarinta kaabayaasha dhaqaale sida: Dekadaha, Garoomada Diyaaradaha iyo Waddooyinka, iyadoo la dhammeystirayo waddada isku xirta Ceel-daahir iyo Ceerigaabo, dibna loo soo nooleynayo dhismaha waddada laamiga ah ee Garoowe-Gaalkacyo, loona hawlgalayo soo daynta mashruuca Shiinaha ee dhismaha Waddada Eyl iyo Garoowe, dib-u-eegista mashruuca ballaarinta dekadda Bosaaso, ka qeyb qaadashada dhismaha dekadda Garacad. Sidoo kale waxaa loo hawlgali doonaa dhismaha waddada laamiga ah ee isku xirta Kalabayr iyo Caluula, Taleex iyo Garoowe, Sheerbi iyo Dhahar, Qardho iyo Baylo, Bosaaso iyo Qandalo, Gaalkacyo Iyo Galdogob, Gaalkacyo iyo Garacad.

BALLAN-QAADKA 29AAD:



@ Fariisinta sarifka doollarka iyada oo lala dagaalamayo dhammaan daabicista lacagaha faalsada ee shilin Soomaaliga ah, lana xoojinayo awoodda wax dhoofinta dalka, lana dar-dargelinayo qorshaha heer Qaran ee soo daabicista lacag cusub oo Soomaaliya yeelato

BALLAN-QAADKA 30AAD:

@ Dib u eegista mashruuca Bangiga Adduunka si Puntland u buuxiso shuruudaha mashruucaani u baahanyahay, gaar ahaan dib-u - habaynta hannaanka maaliyadda , hannaanka shaqaalaha iyo qaab dhismeedka hay'adaha dawladda si ay Puntland u hesho kabista mushaaraadka shaqaalaha dawladda iyo mashaariicda kale ee Bangiga aduunku ugu deeqayo Soomaaliya. Waxaa ballan ah in arrimaha mashruuca Bangiga Aduunka dib loogu eego, lagagana mira dhaliyo lixda bilood ee ugu horaysa Xukuumadda aan soo dhisi doono haddii la i doorto.

YOOLKA 4-AAD
BIXINTA ADEEGYADA BULSHADA

CAQABADAHA HAYSTA BIXINTA ADEEGYADA BULSHADA

1. Waxaa jira carruur badan oo reer Puntland ah oo aan waxbarasho fursad u helin, ama dhaqaale la'aan iyo faqri sababtu ha ahaato, ama goobaha ay deggan yihiin oo aan waxbarashadu gaarin sida meelaha baadiyaha ah oo kale, ka-qaybgalka waxbarashada Puntland waa mid ka hooseeya halkii laga filayey 20 sano kaddib.

2. Buugaagtii Manhajka Waxbarashada Puntland oo aan la qorin, la daabicin lana faafin, taasoo dhaawac wayn ku ah waxbarashada Puntland.

3. Miisaaniyadda ay Dawladdu Waxbarashada u qoondaysay oo aan la gaarsiin meeshii loogu talagalay iyadoo 8% -da loo qoondeeyay aan la wada helin badankeeda.

4. Caqabadaha Waxbarashada haysta waxaa ka mid ah Macallinka oo aan helin xuquuqdii uu mudnaa ha noqoto mushaarkiisa ama tayeyntiisa, Puntland waxaa ka hawlgala 7,123 Macallin, waxaa tababar noocuu doonaba ha ahaadee helay 3,154 Macallin, waxaa Dawladda u qoran inay mushaar siiso 2,117 Macallin oo inta badan mushaar aan helin.

5. Tacliinta Jaamacadaha iyo Macaahidda sare oo tayadoodu aad u hooseyso taas oo ay sabab u tahay qiimeyntii iyo tayo dhawrkii (*Quality Assurance*) oo gabi ahaan meesha ka maqan, iyadoo ay u dheertahay in baraamijyada ay jaamacaduhu bixiyaan badankoodu aanay xiriir dhaw la laheyn baahiyaha suuqa ka jira, ama aan barnaamijyadaasi loogu dhigin ardayga si tayeysan, sababo la xiriira: Macallinka, Agabka, Manhajka, Maamulka iyo guud ahaan Bay'adda ku xeeran tacliinta sare.

6. Caafimaadka heerka sare (Secondary level) ama adeegyada caafimaad ee Isbitaallada oo aan wax weyn oo la sheego laga qaban, shaqada caafimaadku waxay xooggeeda ka socotaa caafimaadka hoose (Primary Health Care) waxaa meeshaas ka muuqda oo baahi wayni ka jirtaa Isbitaalladdii dalka oo aan la daryeelin, tiro ahaan iyo tayo ahaanna u hooseeya.

7. Adeegyada Caafimaadiyo nafaqoee barakacayaasha iyo dadka reer baadiyaha oo aad u hooseysa.

8. Tayada daawo ee dalka oo aad u hooseysa, waxtarkeeduna aad u liito, wax kontorool ahna aan lahayn taasoo dhibaatooyin badan ka timaaddo.

9. Adeegga korontada iyo biyaha oo aad u hooseeya, iyadoo qiimihiisa ay jaangooyaan ganacsato, taasoo keenta in dadka danyarta ahi aanay awoodin iibsiga adeegyada biyaha iyo korontada.

10. Qoondada Puntland ay ka hesho Mashaariicda Gargaarka Bini'aadanimada oo hoos u dhacay, waxayna tilmaamtay warbixin soo baxday 2016 in Puntland ka heshay saamiga gargaarkaas 14% taas oo ah mid aad u yar marka la eego abaaraha soo noqnoqday, qaxootiga ka soo laabtey Yemen iyo barakacayaasha badan ee ku sugan Puntland.

BALLAN-QAADKA 31AAD:

@ Waxaa mudnaanta koowaad la siinayaa adeeg waxbarasho oo la baahiyo loona simanyahay, iyadoo la kordhinayo ka qayb galka waxbarashada asaasiga ah iyo tan sareba.

BALLAN-QAADKA 32AAD:

@ Baahinta iyo tayeynta adeegga waxbarashada iyada oo loo marayo joogtaynta bixinta qoondada lacageed ee waxbarashadu ku leedahay miisanayadda Dawladda, si loogu daboolo baahiyaha kala duwan ee waxbarashada sida: dhameystirka iyo qeybinta manhajka, tababarka macalimiinta, maamulka iyo mushaarkooda, dhismaha iyo dayactirka goobaha waxbarashada, kormeerka iyo qiimeynta waxbrashada iyo u fidinta deeq waxbarasho caruurta ka soo jeeda qoysaska danyarta iyo agoomaha, waxayna noqonaysaa mid si joogta loo kordhiyo.

BALLAN-QAADKA 33AAD:

@ Hirgalinta barnaamij waxbarasho oo u gaar ah reer guuraaga si caruurteena miyigu ay u helaan xuquuqdooda waxbarasho ee uu damaanad qaadayo Dastuurka Puntland.

BALLAN-QAADKA 34AAD:

@ Tayeynta tacliinta sare ee dalka iyadoo loo marayo taabbagelinta Guddiga Tacliinta Sare ee Puntland iyo abuuridda barnaamijyo tacliin sare oo dabooli kara baahida loo qabo xirfadlayaal aqoon leh oo ka jawaabi kara baahida suuqa shaqada ee Puntland, iyadoo si gaar ah loo dhiirri-gelinayo Cilmi-baarista iyo Hal-abuurka oo kaalin muhiim ah ka qaadan kara horumarinta tacliinta sare.

BALLAN-QAADKA 35AAD:

@ Tayeynta iyo baahinta adeegyada caafimaadka Asaasiga ah iyo kan heerka labaad (Secondary Health), iyadoo la gaarsiinaayo dhammaan deegaannada Puntland, sarena loo qaadayo aqoonta iyo xirfadaha hawl-wadeenada caafimaadka ee heerarka kala duwan.

BALLAN-QAADKA 36AAD:

@ Tayeynta iyo taabbagelinta Isbitaalada guud (Public Hospitals) ee 9 ka gobol ee Puntland oo laga heli karo adeegyada caafimaad ee bulshadu u baahantahay, iyadoo lagu kabayo cisbitaal guud oo casri ah oo laga yagleelo caasimadda Garoowe kaas oo leh dhammaan adeegyada kala duwan ee takhasusiga ah, loogana maarmi karo baahiyaha caafimaad ee loo aadayo meelaha ka baxsan Puntland.

BALLAN-QAADKA 37AAD:



@ Tayeynta, baahinta iyo kabista adeegyada Biyaha iyo korontada, si loo helo adeeg tayo leh oo jaban daboolina kara baahida bulshada. Waxaa si gaara dib u eegis loogu samayn doonaa hannaanka wax isku darsiga dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay (Public Private Patnership) ee adeegyada biyaha iyo korontada bixiya si loo xaqiijiyo adeeg qiimo ahaan iyo tayo ahaan ku habboon shacabka Puntland.

BALLAN-QAADKA 38AAD:

@ Hirgalinta qorshe lagu xallinayo baahida biyo la'aaneed ee ka jirta deeganada miyiga iyada oo loo marayo tayeynta ilaha biyaha ee hadda jira iyo hirgalinta kuwa cusub si looga haqabtiro baahiyaha biyeed ee haysta xoolo-dhaqatada reer Puntland.

BALLANQAADKA 39-AAD:

@ U qareemidda iyo ka shaqeynta in Puntland ka hesho deeqaha caalamiga ah ee lagu helo magaca Soomaaliya saamiga u qalma iyada oo laga duulayo xaqiiqada ah in Puntland tahay gobolka kaliya ee si buuxda gacanta ugu haya dhulkiisa, ayna suurtagal tahay in si nabad ah looga fulin karo mashaariicda kaabayaasha dhaqaale, gaar ahaan wadooyinka laamiga ah oo u baahan nabad gelyo lagu dhisi karo.

Adeeg Caafimaad oo qof walba gaara, tayadiisana la hubiyey.

YOOLKA 5-AAD

TAABBA GALINTA GARSOORKA & SARRAYNTA SHARCIGA

CAQABADAHA HOR-TAAGAN GARSOORKA PUNTLAND

1. Hay'adda garsoorku ma ahan mid ka madax banaan hay'adda fulinta, ilaa haddana Puntland lagama hirgalin garsoor taabba-gal ah oo ka tarjuma ilaalinta sarraynta sharciga.

2. Waxaa aad u hooseeya tayada aqooneed iyo xirfadeed ee guud ahaan howl-wadeennada garsoorka, taasoo ay weheliso habka lagu shaqaalaysiiyo hawl-wadeennada garsoorka, oo aan ku dhisnayn tartan furan, iyadoo ay wehliso taya-xumo dhanka agabka iyo dhismayaasha.

3. Islaxisaabtanka hay'adda garsoorka dhexdeeda oo liita, waxaana dhacda in garsooruhu wixii uu doono xukumi karo iyada oo aanu jirin hanaan isla-xisaabtan iyo kormeer.

4. Waxaa jira saddex Nidaam caddaaladeed oo is garab socda; Shareecada Islaamka, Dhaqanka iyo Xeerarka u qoran Dawladda, mana jiraan shuruuc iyo hab-raacyo midaysan oo ay ku hawl-galaan iyo wadashaqeyn qeexan oo ka dhaxaysa si loo xaqiijiyo sarraynta sharciga.

5. Gabi ahaan waxaa meesha ka maqan ku dhaqanka caddaalada maamulka iyo dastuuriga (Adminstrative and Constitutional Justice) taas oo ay sababtu tahay in dhaqanka sarraynta sharcigu maqan yahay, maxkamadda sarena aanay ku dhiirran inta badan in ay gasho dacwadaha xiriirka la leh maamulka. Sidoo kale waxaan gabi ahaanba la dhisin qaybtii Dastuuriga ahayd ee Maxkamadda sare, waana sababta keentay in khilaafaadka dastuuriga ah ee Puntland aanay laheyn Marjac loogu noqdo.

6. Xeerarka qaarkood ee ay ku shaqeeyaan Garsoorka Puntland, sida xeerka ciqaabta, xeerka madaniga, xeerka habka ciqaabta, xeerka habka madaniga, waa kuwo la sameeyey 1960 kii ilaa 1970 kii, Axkaamtooduna maaha kuwa la jaanqaadi kara waqtiga hadda aan joogno, gaar ahaan marka la fiiriyo isbeddallada siyaasadeed, dhaqan-dhaqaale, bulsho iyo sharciyeed.

7. Dadka oo aan kalsooni ku qabin nidaamka Garsoorka ee Dawladda, inta badanna dacwadahooda la aada Gar-maqalka Odayaasha iyo Culumada. Taasoo ay

ugu wacantahay musuqmaasuqa iyo eexda ay ka tirsanayaan nidaamka garsoorka iyo dadka oo aan aqoon iyo wacyi badan u lahayn Nidaamka Garsoorka Dawladda iyo Sarraynta Sharciga.

8. Isbarbaryaac ka jira habka diyaarinta shuruucda iyo tayadooda, iyada oo aan inta badan xeerarka cusub ee Dawladda si wanaagsan loo faafin, aysanna jirin meel loogu hagaago xeerarka Dawladda iyo go'aammada Maxkamadaha.

9. Inta badan Garsoorka waxaa hareeyey dhaqaale la'aan, iyadoo xitaa misaaniyadda aanu ku lahayn wax gaara 1%, taasoo keentay inay noqoto Hay'ad faqri ah oo magan u ah Hay'adda fulinta.

BALLAN-QAADKA 40AAD:

@ Dib-uhabeynta garsoorka gaar ahaan hannaanka soo xulista hawl-wadeennada garsoorka, abuuridda hannaanka kormeerka iyo isla-xisaabtanka ee garsoorka dhexdiisa iyo dib-u-habeynta xeerarka iyo habraacyada Hay'adda Garsoorka; si loo taabba-geliyo garsoor bixin kara adeeg caddaaladeed oo tayo leh kuna shaqeyn kara sarraynta sharciga, fulinta sharciyada iyo xeerarka dalka loo dejiyay.

BALLAN-QAADKA 41AAD:

@ Tayeynta shaqaalaha garsoorka sida: Garsoorayaasha, Xeer-ilaaliyayaasha iyo Kal-kaaliyayaasha iyadoo la abuurayo Machadka Sare ee Tababarka Garsoorka ee Puntland, kaasoo shaqadiisu tahay tayeynta hawl-wadeennada garsoorka heerarkiisa kala duwan.

BALLAN-QAADKA 42AAD:

@ Kordhinta Miisaaniyadda Garsoorka ilaa 3%, iyadoo la sameynayo Sanduuqa Garsoorka (Judiciary Fund), si loo tayeeyo loona xoojiyo madax banaanidooda

BALLAN-QAADKA 43AAD:

@ Xoojinta Garsoor helista dadka saboolka ah (Access to Justice) iyo Sare-u-qaadista wacyiga Bulshada ee ku aaddan qiimaha Garsoorka iyo kaalinta uu ku leeyahay xaqiijinta Caddaalad-Bulsho iyo sarraynta sharciga, iyada oo la taabba galinayo lana xoojinayo Hay'adaha cadaaladda ee garsoorka ka barbar shaqeeya sida ururka qareenada (Bar Association).

BALLANQAADKA 44-AAD:

@ Xoojinta xafiiska Garyaqaanka Guud iyo Xafiiska Xeer-ilaaliyaha guud si loo tayeeyo isla-xisaabtanka, daah-furnaanta dacwadaha, xeerarka iyo habraacyada kale ee xiriirka la leh gaarista caddaaladda.

BALLANQAADKA 45-AAD:

@ Xoojinta kaalinta uu garsoorku ku leeyahay ilaalinta xuquuqaha kala duwan ee uu dammaana qaadayo Dastuurka heer Federaal iyo heer Puntland; sida: xuquuqda shaqaalaha, xorriyadda saxaafadda iyo nabadgelyada suxufiyiinta, xorriyadda fikirka, xuquuqda siyaasadda iyo ka-qeybgalka maamulka, xuquuqda dadka la hayb-sooco, xuquuqda dadka naafada ah iyo xuquuqda barakacayaasha iyo qaxootiga.

BALLANQAADKA 46-AAD:

@ Is-waafajinta hannaanka cadaaladeed ee Shareecada, Dhaqanka iyo kan madaniga ah iyadoo la dejinayo habraacyo mideynaya nidaamyada caddaaladda ee kala duwan, una beddelaya isbarbaryaaca hadda jira fursad wada-shaqeyn iyo is-dhammeystir ay marjac u tahay Shareecada Islaamku.

BALLANQAADKA 47-AAD:

@ Dhisidda qeybta qaabilsan dacwadaha dastuuriga ah ee maxkamadda sare si waafaqsan qodobka 94aad ee dastuurka Puntland iyo xoojinta awoodda maxakamadda sare u leedahay dhageysiga dacwadaha la xiriira arrimaha maamulka (sida dacwadda u dhaxaysa laba hay'adood oo dowli ah ama qof muwaadin ah iyo hay'ad dawli ah).

YOOLKA 6-AAD

DARYEELKA DEEGAANKA IYO XAKAMEYNTA SAAMEYNTA ISBEDDELKA CIMILADA

CAQABADAHA KA JIRA DEEGAANKA IYO LA QABSIGA SAAMEYNTA ISBADALLADA CIMILADA

1. Fulin la'aanta siyaasadaha iyo xeerarka u dagsan ilaalinta deegaanka.

2. Xaalufinta deegaanka iyo magaaleynta aan loo meel-dayin.

3. Ilaalinta deegaanka oo aan wax qoonda ah oo ka baxsan mushaaraatka shaqaalaha iyo adeegga wasaaraadda aan ku laheyn Miisaaniyadda dawladda Puntland.

4. Aqoonta iyo cilmi-baarista la xiriirta daryeelka deegaanka oo aad u hoosaysa.

5. Adeegsiga dhuxusha oo weli si xoog leh uga jira deegaannada Puntland, iyada oo aan la hirgalin ilaha tamarta bedelka ka ah isticmaalka dhuxusha, sida haamaha gaaska la shito oo wali qaali ka ah deegaannada Puntland.

BALLAN-QAADKA 48AAD:

@ Hirgelinta Siyaasadda iyo Xeerka Deegaanka Puntland oo muddo hore la ansixiyey aanse loo fulin sidii loo baahnaa.

BALLAN-QAADKA 49AAD:

@ La-dagaallanka jarista dhirta iyo xaalufinta Deegaanka, iyadoo laga dhisayo Haamaha lagu kaydiyo gaaska wax lagu shito magaalada Boosaaso si qiimo jaban loogu helo haamaha gaaska la shito, taasina ay gebi ahaanba meesha ka saarayso isticmaalka dhuxusha. Sidoo kale waxaa xoogga la saari doonaa ka faa'iidaysiga tamarta cadceedda (Sollar) iyo dabaysha.

BALLAN-QAADKA 50AAD:

@ Dardargelinta Mashaariicda lagu horumarinayo Deegaanka; sida: Mashaariicda lagu qabanayo biyaha roobka, dhireynta, ka-hortagga nabaadguurka, iyo sameynta seerayaal lagu xannaaneeyo ugaarta.

BALLAN-QAADKA 51AAD:

@ Xadeynta deegaameynta xad-dhaafka ah iyadoo loo dejinayo halbeeg sharciyeed oo la raaco.

BALLAN-QAADKA 52AAD:

@ Xoojinta xarumaha cilmi-baariseed ee ku shaqada leh ka digista masiibooyinka iyo saameynta isbeddelka cimilada sida: daadadka, abaaraha I.W.M.

Ballan-qaadka 53aad: Xoojinta adkaysiga xoola-dhaqatadu ay u yeelan karaan abaaraha soo noq-noqda iyo daadadka iyadoo la sameynayo wacyi-gelin dadweyne, iyo keyd isugu jira baad iyo biyo.

BALLAN-QAADKA 53AAD:

Xoojinta adkaysiga xoola-dhaqatadu ay u yeelan karaan abaaraha soo noq-noqda iyo daadadka iyadoo la sameynayo wacyi-gelin dadweyne, iyo keyd isugu jira baad iyo biyo.



YOOLKA 7-AAD
BALLANQAADYO U GAAR AH DHALLINYARADA

BALLAN-QAADKA 54AAD:

@ Sare u qaadidda xirfadaha iyo aqoonta dhallinyarada, si ay ugu fududaato helitaanka fursado shaqo oo ay ku maareeyaan naftooda, ehelkooda iyo bulshadoodaba.

BALLAN-QAADKA 55AAD:

@ Kobcinta Hal-abuurka dhallinyarada, taas oo awood u siinaysa inay la yimaadaan fikrado ganacsi iyadoo loo marayo dejinta qorshe shaqo abuur loogu samaynayo dhalinyarada oo sanadle ah.

BALLAN-QAADKA 56AAD:

@ Xoojinta xuquuqda siyaasiga ah (Political Rights) ee dhalinyarada, awoodna loo siiyo inuu wax doorto lana doorto, taas oo u sahlaysa ka-qeybgal baahsan oo dhinaca siyaasadda iyo in codkooda la maqlo, siyaasadaha danta iyo maslaxadda u ah dhallinyaradana ay ka qeyb qaataan samaynteeda iyo hirgelinteeda, awoodna ay u yeeshaan inay ka hor-yimaadaan wixii dhallinyarada dhibaato ku ah.

BALLAN-QAADKA 57AAD:

@ Xoojinta kaalinta dhalinyaradu ku leeyihiin ka qayb-galka hannaanka jaangoynta iyo hirgalinta barnaamijyada nabad adkeynta, iyada oo loo marayo barnaamiyo wacyi-galin oo qorshaysan.

BALLAN-QAADKA 58AAD:

@ Maalgelinta iyo horumarinta xarumaha madadaalada iyo cayaaraha ee dhalinyarada sida garoomada ciyaaraha, goobaha iswaydaarsiga aragtiyada, iyo hirgalinta maktabadaha caamka ah.

BALLAN-QAADKA 59AAD:

@ Hirgalinta siyaasado waxbarasho oo isu dheelitiraya baahiyaha waxbarasho ee dhalinyarada iyo fursadaha shaqo ee suuqa, iyadoo la xaqiijinayo u sinnaanta fursadaha shaqo ee dalka ka soo baxa lagana fogaanayo eexda iyo caddaalad darrada la xiriirta habka shaqaalaysiinta.

BALLAN-QAADKA 60AAD:

@ Dejinta qorshe wacyigalineed iyo ka hortag khataraha maandooriyaha iyo cudarada faafa, iyada oo laga qayb galinayo culamada, odayaasha dhaqanka, suugaanyahanada iyo dhalinyarada, lana hirgalinayo goobo lagu dhaqan celiyo dhalinyarada ay maandooriyuhu diloodeen iyo kuwa xadgudubka gaysta.

Ballan-qaadka 61aad: Xoojinta iyo tayeynta ururrada dhalinyarada ee hadda jira iyadoo la xaqiijinayo madax-banaanida dalladda ay ku mideysanyihiin dhalinyarada Puntland si ay u noqoto mid ka tarjumi karta filashooyinka dhalinyarada Puntland.

YOOLKA 8-AAD

BALLANQAADYO U GAAR AH

HAWEENKA

BALLAN-QAADKA 62AAD:

@ Xoojinta helitaanka xuquuqda Haweenka si waafaqsan Shareecada Islaamka iyadoo si gaar ah xoogga loo saarayo inay haweenku helaan xuquuqdooda bulsho, siyaasadeed iyo dhaqaale oo dhamaystiran.

BALLAN-QAADKA 63AAD:

@ Dhiirigalinta hal-abuurka ganacsi ee Haweenka, waxaana lala garab istaagayaa taageero siyaasadeed, xeerar, tababar iyo maal-galin si loo hirgaliyo siyaasadda mudnaan siinta haweenka iyo horumarintooda.

BALLAN-QAADKA 64AAD:

@ Ciribtirka dhaqamada aan waafaqsaneyn shareecada Islaamka ee lidka ku ah haweenka sida gudniinka fircooniga ah iyo ladagaallanka guud ahaan tacaddiyada loo geysanayo haweenka sida Kufsiga.

BALLAN-QAADKA 65AAD:

@ Tayeynta adeegga caafimaad ee hooyada iyo dhalaanka iyada oo lagu baahinayo dhammaan deegaanada Puntland, sarena loo qaadaayo wacyiga bulshada ku aadan arrinkaas, si loo yareeyo dayaca iyo khataraha soo waajaha hooyooyinka gaar ahaan xilliga dhalmada.

BALLAN-QAADKA 66AAD:

@ Mudnaan siinta waxbarashada gabdhaha, tababarkooda iyo kor u qaadista ka qayb-galkooda waxbarashada asaasiga ah iyo tan sareba, waxaana looga samayn doonaa qoondo u gaar ah deeqaha waxbarasho ee dawlladu bixiso.

LIFAAQ B

DENI & DADWEYAHA PUNTLAND

TAYEYN & TIIGSI

DR. SICIID C. DENI